

WARQADDII RASUUL BAWLOS U QORAY

FILEMON

Bilowga Warqaddan

1 ¹Anigoo Bawlos ah oo Ciise Masiix maxbuus u ah, iyo walaalkeen Timoteyos, waxaannu warqaddan u qoraynaa Filemon oo ah gacaliyahayaga nala shaqeeya, ²iyo walaashayo Afiya, iyo Arkhibbos oo askar nala ah, iyo kiniisadda gurigaaga ku taal. ³Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha Aabbeheenna ah iyo Rabbi Ciise Masiix.

Jacaylkii Iyo Rumaysadkii Filemon

⁴ Had iyo goorba Ilaahay baan kuugu mahadnaqaa, anigoo baryadayda kugu xusuusanaya, ⁵waayo, waxaan maqlay jacaylka aad quduusiinta oo dhan u qabto iyo rumaysadka aad Rabbi Ciise ku rumaysato. ⁶Oo waxaan baryayaa in wadaagidda iimaankaagu uu socodsiiyo aqoonta wax kasta oo wanaagsan oo inoogu jira Masiixa. ⁷Waayo, jacaylkaaga waxaan ku haystay farxad iyo dhiirranaan badan, maxaa yeelay, qalbiga quduusiinta adaa qabowjiyey, walaalkayow.

Oneesimos Oo Ahaa Addoon Cararay

⁸Sidaas daraaddeed, in kastoo aan Masiixa ku leeyayah dhiirranaan badan inaan kugu amro waxa kuu eg, ⁹haddana waxaan ka jeelaan lahaa inaan ku baryo jacaylka aawadiis, anigoo ah duqii Bawlos, maxbuusna Ciise Masiix u ah. ¹⁰Waxaan kuu baryayaa wiilkayga Oneesimos oo aan dhalay anigoo xabbisan, ¹¹kii waagii hore aan waxtarka kuu lahaan jirin, haatanse adiga iyo anigaba wax ina tara. ¹²Waan kuu soo celinaya, isagoo qalbigayga ah. ¹³Waxaan jeelaan lahaa inaan sii hayo inuu aawadaa iigu adeego inta aan injiilka u xabbisanahay. ¹⁴Laakiinse ma aanan doonayn inaan sameeyo wax aadan ila ogayn, inaan wanaaggaagu noqon dirqi laakiinse uu noqdo ikhtiyaar. ¹⁵Mindhaa wuxuu cabbaar kaaga maqnaa inaad weligaa haysatid; ¹⁶laakiinse aadan mar dambe u haysan addoon sidiis, illowse si mid addoon ka wanaagsan oo ah walaal aan khusuusan anigu jeclahay, laakiinse adigu aad iga sii jeceshahay, xagga jidhka iyo

xagga Rabbigaba.¹⁷ Haddaba haddaad igu tirinaysid inaan ahay saaxiibkaaga wax kula wadaaga, isaga u aqbal sidaad ii aqbali lahayd.¹⁸ Oo hadduu ku xumeeyey ama wax kaa qabo, aniga igu xisaab.¹⁹ Anigoo Bawlos ah waxaan gacantayda ku qorayaan, Anigaa bixin doona. Kugu odhan maayo, Wax baan kugu leeyahay xataa naftaadaba ha noqotee.²⁰ Haah, walaalkayow, xagga Rabbiga farxad aan kaa helo, qalbigaygana xagga Masiixa ku qabowji.²¹ Wuxaan aaminsanahay addeeciddaada, oo sidaas daraaddeed ayaan warqaddan

kuugu soo qorayaan, anigoo garanaya inaad samaynaysid wax ka sii badan waxaan leeyahay.

Dhammaadka

²² Isla markaasna ii diyaari meel aan ku hoydo; waayo, waxaan rajaynayaa in baryadiinna laygu kiin siiyo.

²³ Waxaa ku soo salaamaya Ebafras oo xagga Ciise Masiix maxbuus ila ah,²⁴ iyo Markos, iyo Aristarkhos, iyo Deemaas, iyo Luukos, kuwaas oo ila shaqeeya.

²⁵ Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ruuxiinna ha la jirto. Aamiin.